Afrika iyo horumarka qarniga

Saciid Cali Shire

Meesha Afrika waagii hore lala xiriirin jiray dib u dhac, colaad, faqri iyo musuqmaasuq, wixii ka danbeeyey sanadkii 2000 Afrika waxay noqotay awood dhaqaale, astaan horumar, iyo hoy ganacsi iyo maalgelin. Isbeddellada dhaqaale, siyaasadeed iyo mujtamac ee ka soo ifbaxay Afrika tobankaas sanona waxaa saldhig u ahaa hoggaan tayo leh oo sameeyey hiraal qaran iyo habayn dhaqaale. Hoggaankaas wanaagsan ayaana qayb ahaan loo aaneeyaa kobocaas dhaqaale oo wixii ka danbeeyey 2000 celcelis ahaan madaxa la dhaafay 4.9%, waddammada qaarkoodna gaarayey 10%. In kastoo kobocaasi fiican yahay marka loo fiiriyo caalamka, haddana Afrika dhaqaaleheedu wali aad buu uga hooseeyaa kan qaaradaha kale iyo waddammada kale intaba. Tusaale ahaan baaxadda dhaqaalaha ee Afrika oo la isku daray (GDP) wali wuu ka hooseeyaa kan Mexico ama Ruushka, US$ 1.6 triliyan.

In kastoo dad badani koboca dhaqaale ee Afrika la xiriiriyaan sicirka badeecadaha Afrika dhoofiso, sida shidaalka iyo biraha qaaliga ah, oo si aad ah sare ugu kacay wixii ka horreeyey 2008-dii, haddana, daraasad ay McKinsey soo bandhigtay horroodkii sanadkaan ayaa muujisay in wax ka yar 30% kobocaas lala xiriirin karay khayraadka dabiiciga ah. Waddammada ugu koboca fiican Afrika qaarkood, sida Ruwaanda, maba laha wax khayraad ah oo la tilmaami karo, ma laha bad (land lock), waa buux dhaaf (over populated), haddana wixii ka danbeeyey dagaalkii sokeeye, ee hareeyey waddankaas, koboceedu marna kama hoos marin 8%.

Kobocaas xooggiisuna wuxuu ka imaanayey isgaarsiinta (telecommunication), hay'adaha maaliyada (financial institutions), warshadaynta, dhismaha, dalxiiska, tafaariiqda (retail sector) iyo adeegyada.

Daraasadda McKinsey waxay sidoo kale muujisay in isbeddel lagu sameeyey hannaanka dawladnimo uu gacanta ugu weyn ka geystay horumarka Afrika. Isbeddelladaas siyaasadeed ee horseeday horumarka Afrika waxaa ka mid ah: is beddel lagu sameeyey nidaamka dhaqan dhaqaale ee waddammadaas, sida in la sameeyey nidaam fur-furan (transparency) oo ku salaysan xisaabtan (accountability); isbeddello lagu sameeyey shuruucda iyo tayayn lagu sameeyey nidaamka maammul si loo soo jiito maalgelimaha dibedda. Waxaa labadaas arrimood dhinac socday siyaasaddo dhaqaale oo wax lagaga qabtay sicir-bararkii (meesha 1990 sicir-bararka Afrika celcelis ahaan ahaa 25%, dhowrkii sano ee la soo dhaafay waa ka hooseeyey 7%) iyo daymihii lagu lahaa waddammadaas iyo kharashkii dawladda (budget deficit). Siyaasadahaas waxaa dhinac socday shuruuc sharikaadkii dawliga ahaa loogu wareejinayo ganacsato (privatisation), fur-fur lagu sameeyey ganacsiga, canshuurihii oo la fududeeyey hoosna loo dhigay, tixgelinta loo hayo sharciga oo sare loo qaaday, maammul wanaag, iyo kaabayaasha dhaqaalaha sida korontada, waddooyinka, dekadaha iyo garoomada diyaaradaha oo tayadooda iyo tiradoodaba sare loo qaaday. Sidoo kale, waxa waddammadaasi samaysteen kayd lacageed (reserve).

Isbeddelladaasi waxay horseedeen in Afrika yeelato awood tartan, soo jiidato maalgelin, noqotona hoy ganacsi iyo maalgelin. In kastoo Afrika wali ka hooseyso qaaradaha kale, haddana isbeddelladaasi waxay si aad ah hoos ugu dhigeen faqrigii iyo ku tiirsanaantii caawimaadda dibedda. Waxay sidoo kale sare u qaadeen tayadii nolosha, Afrikana mar kale ka dhigeen meel lala xiriiriyo wanaag.

In kastoo wali ay jiraan cabsi laga qabo in koboca Afrika sii socon doono mustaqbalka iyo in kale, haddana marka la fiiriyo isbeddellada ay sameeyeen hoggaamiyayaasha Afrika iyo kuwa ka dhacaya caalamka waxaa muuqata in Afrika leedahay mustaqbal wanaagsan. Tusaale ahaan, waxaa muuqata in Afrika saami weyn ka heli doonto baahida shidaal, biraha qaaliga ah, cuntooyinka, iyo baahida dhul beereedyada ee maalinba maalinta ka danbaysa sare u sii kacaysa. Waxaa sidoo kale muuqata in Afrika waxyaabahaas hodon ku tahay. Tusaale ahaan, Afrika waxaa ku jira 10% kaydka shidaalka adduunka; 80% kaydka biraha loo yaqaan chromium iyo platinum.

Meesha ganacsiga Afrika uu markii hore 'la hayste' u ahaa waddammadii soo gumaystay Afrika, i.e. Yurub, wuxuu maanta noqday mid la tartama waddammadaas. Tusaale ahaan, meesha ganacsiga waddammada Yurub iyo Afrika hoos u dhacay 35% tobankii sano ee la soo dhaafay, kan u dhexeeya Afrika iyo Aasia (siiba shiinaha) wuxuu sare u kacay 25%. Arrintaas danbe waxay abuurtay heshiis iskaashi oo dhex maray Afrika iyo Aasiya. Tusaale ahaan, Shiinuhu wuxuu waddanka Coongo ka hirgelinayaa mashiiriic horumarin oo qiimohoodu sare u dhafayo US$ 6 bilyan, meesha isagana loo ogolaaday in uu ka faa'iidaysto macaadiinta faraha badan ee ku kaydsan waddankaas. Waxaa sidoo kale si aad ah sare ugu kacay ganacsiga ka dhexeeya waddammada Hindiya, Brazil iyo Bariga Dhexe iyo Afrika.

Baahida loo qabo macaadiinta faraha badan ee Afrika ay hodonka ku tahay ayaa iyana keentay in Afrika ay u furmaan albaabo cusub oo maalgelin. Tusaale ahaan, maalgelinta tooska ah ee Afrika tegaysa meeshay sanadkii 2000 ay ka hoosaysay US$ 9 bilyan, sanadkii 2008-da waxay madaxa la dhaaftay US$ 62 bilyan. Maalgelintaasna qayb ahaan waxaa saldhig u ah faa'iidada laga helo maalgelimaha lagu sameeyo Afrika oo si aad ah uga saraysa midda laga helo waddammada Shiinaha, Hindiya iyo Indooniisiya; isbeddel siyaasadeed iyo dhaqaaale; iyo cabsidii laga qabay Afrika oo maalinba maalinta ka danbaysa hoos u sii dhacaysa. Dhanka Isbeddelka haddaan wax ka taabano waxaad arkaysaa in waddammo badani la yimaadeen maammul wanaag iyo nidaam dhaqan dhaqaale oo casri ah. Isbeddelladaasina waxay hoos u dhigeen khatarta (risk) siyaasadeed iyo dhaqaale ee waddammadaas.

Isbeddelka ku dhacaya demograafiyada, sida taranta dadka iyo guur-guurka, ayaa iyana qayb weyn ka geystey horumarka iyo koboca dhaqaale ee Afrika. tusaale ahaan, meesha 1980-kii wax ka yar 25% dadka Afrika ku noolaayeen magaalooyin, 2010 tiradaasi waxay madaxa la dhaaftay 40%, waxaa sidoo kale 2030-ka la saadaalinayaa in tiradaasi madaxa la dhaafi doonto 60%. In kastoo guur-guurku culays dhanka adeegyada ah ku soo kordhinayo magaalooyinka, dhinaca kalena waxaa sare u kaca tayada shaqaalaha iyo waxsoosaarka labadaba.

Saciid Cali Shire
Buuh Consulting LTD
t. 44 (0) 7838236171
E. saidshire@buuh.net
W. Www.buuh.net